



# Deeqda Gargaarka Degdega COVID-19— ee ka timid looguna tallogalay soogalootiga.

Soogalootiga hadaan nahay, waxaan Washington ka dhiganay gurigeena. Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, oo aadan u qalmin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, deeqdaan adiga ayaa laguugu tallogalay.

## **Waa maxay deeqda?**

Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 waxay siisaa lacagta gargaarka COVID soogalootiga aan u qalmin deeqaha gargaarka faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta. Haddii aad codsatid, waxaad heli kartaa \$1,000 lacag bixinta tooska ah ee halka waqti (illaa \$3,000 gurigiiba).

## **Sidee ayay u shaqeysaa?**

Waxaad ka codsan kartaa onleenka, taleefoon, ama Boosto ahaan. Dhammaan sadexda iqtiyaar waxaa lagu heli karaa Somaali. Markii arjigaaga la ogolaado, waxaad ku heleysaa lacag bixintaada jeeg ahaan, kaarka hadiyada (Visa Kaar).

## **Yaa maamulo deeqda?**

Deeqda waxaa maamulo hay'adaha bulshada soogalootiga ay hoggaamiyaan ee Washington—iska dadka u ololeeyey aasaasida Deeqdaan. Waxaa kamida Shabakada Midnimada Soogalootiga Washington (WAISN), Mashruuca Xaquuqaha Soogalootiga Waqooyi-galbeed, iyo hay'ado kaloo badan. Lacagta waxaa bixiyo Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Gobolka Washington.

## **Xogteyda miyay illaalsantahay?**

Haa. Ma jiraan wax ku jiro arjigaaga oo abid loola wadaagayo si iqtiyaar ah dowlada, ICE, ama fullinta sharciga.

## **Yaa codsan karo deeqda?**

Si aad u codsato gargaarka, waa inaad:

- Ku nooshahay Gobolka Washington
- Ahaataa ugu yaraan 18 sanno jir
- Ay si weyn kuu saameysay cudurka safmarka (sida shaqo luminta, aad qaaday fayraska, ama daryeeleysid xubin qoyska ah oo ku dhacay cudurka)
- Aadan u qalmin helitaanka lacagaha gargaarka faderaalka ama lacagta caymiska shaqo la'aanta sabab la xiriirto heerka soogalootiga.

Markii aad codsatid, waxaad u baahantahay inaad bixisid koobiga dokumintiyada qaar si aad u muujisid aqoonsigaaga iyo dagaanshahaaga (sida kaarka aqoonsiga, biilka korontada, ama risiidka kirada).

## **Miyay sharciga dallacaada bulshada quseysaa?**

Maya. Deeqdaan waxaa loo tixgalinayaa gargaar masiibo halka waqti ah, kaa hor istaagi mayso inaad heshid kaarka cagaaran mustaqbalka.

**CODSO UGU  
DAMBAYN  
6-DA DISEEMBAR:**

**[www.immigrantreliefwa.org](http://www.immigrantreliefwa.org)**

**1-844-724-3737 (Isniin ilaa**

**Jimce 9:00 am – 9:00pm)**

**Soogalooti midba midka  
kale daryeelaya.**

